

# KU XIRNAANTA TAAGEEROOYINKA BULSHADA

## Macluumaad loogu talo galay Waalidiinta oo ku Saabsan Maamulka Maxaliga ah ee Naafada Caqliga iyo Kobaca (LIDDA)

Hel khayraadkaan oonlaynka ah

Haddii ilmahaaga loo aqoonsado inuu qabo **naafada caqliga ama dib u dhaca kobaca**, mid kamid ah talaabooyinka koobaad ee ugu horeeya waa in aad la xiriirto LIDDA-daada. Bogaga soo socda ayaa ku siinaaya xogta aad u baahan tahay si aad u hesho oo aad ula xiriirto LIDDA-da deegaankaaga.

### Waa maxay LIDDA?

LIDDA waa meelaha aad ka bilaabayso qaarkood adeegyada Naafooyinka Caqliga iyo Kobaca (IDD) ee gudaha Texas. LIDDA kasta ayaa u adeegta gobal gaar ah waxayna masuul ka tahay ka caawinta qoysaska helitaanka taageerooyinka mudada dheer oo u sahlaaya carruurta iyo dadka waawayn ee qaba IDD inay ku noolaadaan ayna ku kobcaan bulshooyinka.

### Xidhiidhka Dugsiga:

La hadal xiriirka dugsiga ilmahaaga haddii aad su'aalo ka qabto hlitaanka barnaamijkaaga LIDDA ama haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo helitaanka lifaaqyada webseedyada ee ku jira dukumiintigaan.

| |
|---|
| Magaca: |
| Doorka: |
| Iimaylka: |
| Taleefanka: |

Qeexitaanka shuruudaha naafada ee u qalmidda waxbarashada gaarka ah

### LIDDA ayaa bixisa adeegyada iyo taageerooyinka kala duwan, ayna ku jiraan:

- **Helitaanka iyo diiwaan gelinta:** Bixinta xog ku saabsan adeegyada iyo taageerooyinka, qiimeynta in ilmahaagu u qalmo adeegyada IDD, iyo ka caawinta qoysaska inay codsadaan kaalmada kabista dakhliga (SSI), caymiska naafada ee social security (SSDI), iyo Medicaid
- **Iskudubaridka adeegga:** Ka caawinta qoysas in ay helaan adeegyada caafimaadka, waxbarashada, iyo bulshada iyo taageerada
- **Daryeelka nasinta ah:** Bixinta caawimaad amudada kooban marka daryeel bixiyaha aan la heli karin
- **Adeegyada gaarka ah oo lagu saleynaayo baahida ama helitaanka:** Bixinta adeegyada sida kaalmada shaqada, kalkaalinta, baxnaaninada, iyo taageerada gaarka ah. Fadlan ogoow in adeegyadaan ay kala duwanaan karaan ayadoo ku xiran gobalka.
- **Barnaamijyada Medicaid:** Ku darista shaqsiyaadka liiska xiisaha ee barnaamijyada lacag dhaafka ee Medicaid iyo ka caawinta qof u qalma iska diiwaan gelinta barnaamijyada Medicaid qaarkood

SPEDTEX Special Education Information Center — TEA Texas Education Agency — Texas SPED Support



# KU XIRNAANTA TAAGEEROOYINKA BULSHADA

Macluumaad loogu talo galay Waalidiinta oo ku Saabsan Maamulka Maxaliga ah ee Naafada Caqliga iyo Kobaca (LIDDA)

## Barnaamiyada Lacag-dhaafka Medicaid

Texas waxay bixisaa barnaamiyada Lacag-dhaafka Medicaid ee kala duwan oo baxsha adeegyada iyo taageerooyinka mudada dheer ee shaqsiyaadka naafada ah ayagoo jooga bulshadooda. Barnaamij kasta wuxuu bixiyaa adeegyo kala duwan wuxuuna leeyahay **liiskiisa gaarka ah ee xiisaha**. Wakiil ka socda barnaamijka LIDDA ee deegaankaaga ayaa kaa caawin kara inaad fahanto dookhyada kugu haboonaan kara ayadoo lagu saleynaayo awoodaha hadda iyo mustaqbalka ee ilmaha iyo baahiyaha taageerada.

- Kaalmada Nolosha Bulshada iyo Adeegyada Taageerada (CLASS) — dhammaan da'aha
- Indhool iyo Dhagool qaba Naafooyin Badan (DBMD) — dhammaan da'aha
- Adeegyada Guriga iyo Bulshada ku Saleysan (HCS) — dhammaan da'aha
- Barnaamijka Carruurta Caafimaad ahaan Gacanta lagu hayo (MDCP) — da'd 20 iyo ka yar
- STAR+PLUS Adeegyada Guriga iyo Bulshada ku Saleysan (HCBS) — da'da 21 iyo kawayn
- Nolosha Guriga ee Texas (TxHml) — dhammaan da'aha
- Adeegyada Xoojinta Dhalinyarada (YES) — da'aha 3 ilaa 18

## Waa maxay "Liiska Xiisaha"?

Liisaska xiisaha ayaa mararka qaar loogu eeraa "liiska sugitaanka." Dadka waxaa la gashaa liiskaan ayadoo lagu saleynaayo sida loosoo kala hormaro. Marka magaca qofku uu ku jiro qaybta kore ee liiska waxaa la soo xiriiri doona wakiilka Gudiga Adeegyada Caafimaadka iyo Dadka (HHSC) ama LIDDA. Booska barnaamijyada waxaa lagu saleeyaa maal gelinta la heli karo, dadka ayaana laga yaabaa inay ku jiraan liiska xiisaha sanado kahor inta aan lala soo xiriirin.

### Tilmaamaha Muhiimka ah:

- **Ku qor magaca ilmahaaga liisaska xiisaha ee barnaamiyada Lacag-dhaafka Medicaid sida ugu dhakhsaha badan ee naafada la aqoonsado** (aragga bogga 3). Markasta waad diidi kartaa adeegyada haddii aadan u baahnayn mustaqbalka.
- Uma baahnid in aad cadeyso u qalmidda si laguugu daro liisaska xiisaha.
- Cusbooneysii xogtaada xiriirka si aad u xaqiijiso in lagula soo xiriiro.
- Hubi xaalada ilmahaaga sanad kasta. Hubinta marka lagu dhawaado dhalashada ilmahaaga ayaa ah qaab wanaagsan oo aad ku xasuusanayso samaynta tan.



SPEDTEX Special Education Information Center · TEA Texas Education Agency · Texas SPED Support



# KU XIRNAANTA TAAGEEROOYINKA BULSHADA

Macluumaad loogu talo galay Waalidiinta oo ku Saabsan Maamulka Maxaliga ah ee Naafada Caqliga iyo Kobaca (LIDDA)

## Ku xirnoow LIDDA:

- **Waydii gudiga diiwaan gelinta, dib u eegista, iyo fasaxa (ARD) ilmahaaga** meesha aad ka helayso xogta ku saabsan LIDDA oo u adeegaysa degmadaada.
- La xiriir xaruntaada LIDDA si **aad u mudeysato kulanka koobaad**.
- Inta lagu jiro kulanka koobaad, shaqaalaha LIDDA ayaa ka hadli doona **dookhyada adeegyada iyo liisaska xiisaha** oo waafaqsan baahiyaha ilmahaaga.

## Su'aalaha aad waydiinayso Xiriirkaaga LIDDA:

- Waa maxay adeegyada lagu baxsho barnaamijkaan LIDDA?
- Sidee ayaan ugu darayaa magaca ilmahayga liiska xiisaha ee barnaamiyada Lacag-dhaafka Medicaid?
- Waa maxay dukumiintiyada aan u baahan nahay in aan keeno?
- Yaan la hadli karaa haddii aan su'aalo ka qabo adeegyada iyo taageerooyinka ilmahayga?
- Ma jiraan wakaalado kale ama barnaamijyo ilmahaygu heli karo?

## LIDDA ee Degmadeyda:

| |
|---|
| Barnaamijkayga LIDDA: |
| Iimaylka: |
| Taleefanka: |
| Websaydka: |

Booqo webseedka HHSC si loo baaro LIDDA adoo adeegsanaaya degmada ama koodhka boostada.

## Khayraad Dheeraad ah:

- Texas HHSC:
  - Khayraadka LIDDA
  - Yareynta Liiska Xiisaha
- YourTexasBenefits.com
- The Arc of Texas
- Navigate Life Texas: Waivers and Wait Lists
- Texas Education Agency (TEA)
  - SPEDTex
  - Khayraadka Tubta Kala Guurka ee Texas
  - Khayraadka iyo caawimaada la heli karo: Gal liiska sugitaanka hadda (Taxaneyaasha Muuqaallada Wada hadalka Tooska ah): Ingiriis | Isbaanish | Fiyeednaamiis

SPEDTEX Special Education Information Center | TEA Texas Education Agency | Texas SPED Support